



## FAQs (Su'aalaha inta badan la isweydiyo) ee Hagida dib u furida—

Hoos waxaa ah jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiyo (FAQ) ee ku saabsan Hagida Dib u furida Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ee loogu tallogalay Ururada Madadaalada Banaanka: [FAQ-ga wuxuu u kala qeybsamaa FAQ-ga gobolka oo dhan](#) iyo [FAQ-ga u gaarka ah gobolada ku jiro Wajiga Labaad](#). OHA waxay u bixisaa FAQ-yadaan si ay uga caawiso inay bulshada fahamto hagida, inay ka jawaabaan su'aalaha daneeyeyaasha, iyo inay xaqiijiyaan sida hagida u quseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. FAQ-yadaan ayaa si isdabajoog ah loo cusbooneysiyyaa. FAQ-yadaan looguma talagelin inay galaan booska hagida, laakin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kabaan, oo gacan ka geystaan buuxinta faahfaahinta hagida.

### Su'aalaha Inta adan La isweydiyo ee loogu tallogalay Hagida Madadaalada Banaanka Gobolka oo dhan

#### **S1. Miyaa xerooyinka la ogolyahay haddii aan la imaano teendhooyinkeena oo aan diyaarsano cuntadeena?**

J1. Haa. Dhulalka xerooyinka bulshada iyo kuwa gaarka loo leeyahay waa la ogolyahay inay shaqeeyaan. Howlaha kooxeed waxaa loo ogolyahay xubnaha isku qoyska ah — taas oo ku xadidan 10 qof. Haddii kale, dadka waa inay joogteeyaan masaafo ah ugu yaraan lixda (6) fuud oo u dhaxeeyso dadka.

#### **S2. Sidee ayay xadeynada usu imaanshaha u quseyaan dhulalka xerada?**

J2. Xerooyinka waa inay raacaan xadeynada cabirka usu imaanshaha ee loogu tallogalay gobolka uu dhulka xerada ku yaalo. Dadka xerada waa inay kala fogaadaan ugu yaraan lix (6) fuud marwalba, inay isku kooxd ka tirsan yihiin mooyee. Kooxyada waa inaysan dhaafin 10 qof. Ka tiraac [Aalada Hagida Dib u furida](#) wixii warbixin ah ee ku saabsan cabirada isu imaanshaha.

#### **S3. Miyaa jaakada badbaadada ee dabaasha /qalabyada sabeeyaha shaqsiga (PDFs) loo baahanyahay in la jeermisdilo inta u dhaxeeyso isticmaal walba?**

J3. Haa, jaakadaha badbaadada iyo qalabyada sabeeyaha shaqsiga (PDFs) waa in la jeermisdilaa inta u dhaxeeyso isticmaal walba. Ururada madadaalada banaanka waxaa looga baahanyahay inay si joogta ah u u nadiifiyaan ugana dilaan jeermiska aagagga shaqada, aagagga dadka ku badan yihiin, iyo sagxadaha badanaa la

taabto ee goobaha dadweynaha iyo goobaha gaarka ah ee jardiinooyinka iyo xarumaha. Isticmaal jeermisdilayaasha lagu daray [liiska ansixisay Wakaalada Illaalada Deegaanka \(EPA\)](#) ee loogu talaagalay fayraska SARS-CoV-2 ee sababo COVID-19. Ma jirto badeeco lagu qori doona in loo sameeyay COVID-19 weli, laakin badeecooyin badan ayaa waxay yeelanayaan qoraal ama warbixin laga heli karo websaydyadooda oo ku saabsan wax ku oolkooda fayraska korona ee aadanaha.

**S4. Sidee ayaan u nadiifinaa doomanka ulaha, doomanka nafarlaha, ulaha doonta iyo qalabka kaloo la kireysto?**

J4. Ururada madadaalada banaanka waxaa looga baahanyahay inay si joogta ah u nadiifiyaan ugana dilaan jeermiska aagagga shaqada, aagagga dadka ku badan yihiin, iyo sagxadaha badanaa la taabto ee goobaha dadweynaha iyo goobaha gaarka ah ee jardiinooyinka iyo xarumaha. Hay'adaha madadaalada banaanka waa inay nadiifiyaan dhammaan qalabyada la wadaago inta u dhaxeeya isticmaalada. Isticmaal jeermisdilayaasha lagu daray [liiska ansixisay Wakaalada Illaalada Deegaanka \(EPA\)](#) ee loogu talaagalay fayraska SARS-CoV-2 ee sababo COVID-19. Ma jirto badeeco lagu qori doona in loo sameeyay COVID-19 weli, laakin badeecooyin badan ayaa waxay yeelanayaan qoraal ama warbixin laga heli karo websaydyadooda oo ku saabsan wax ku oolkooda fayraska korona ee aadanaha.

**S5: Waa maxay hagida baskiil wadida? Miyay jiraan tallooyin loogu tallogalay kala fogaanshaha u dhaxeeyo baskiileyda, tirada baskiileyda ee kooxda, iyo/ama xirashada maaskaraha adiga oo baskiilka saaran?**

J5: Baskiileyda waa inay raacaan Hagida Gobolka oo dhan ee loogu tallogalay Ururada Madadaalada Banaanka. Tani waxaa ku jirto joogteynta kala fogaanshaha jireed oo ugu yaraan ah masaafo lix (6) fuud ah, xirashada daboolada wajiga markii aysan suurto galeyn in la joogteeyo kala fogaanshahas, iyo in cabirka usu imaanshaha lagu xadido [sharuudaha wajiga gobolka](#) ee loogu talagalay howshaan.

**S6. Haddii wax ka badan dokumintiga hal hagid ay quseyso qeybteyda, sidee ayaan u doortaa midka aan raacayo?**

J6. Ururada waa inay raacaan dhammaan qeybta hagida ee quseyso.

## **Su'aalaha Inta badan La isweydiyo ee loogu tallogalay Hagida Wajiga Labaad ee Ururada Madadaalada Banaanka**

**S1. Intee jeer ayaa ah inaan nadiifino dhulalka banaanka?**

J1. Howlwadeenada ururada madadaalada banaanka waa inay nadiifiyaan dhulalka banaanka hal mar inta lagu jiro waqtiyada isticmaalka badan yahay iyo markale dhammaadka maalinta.

**S2. Waa maxay hagida loogu tallogalay barnaamijyada waaya aragnimada dadka waaweyn ee banaanka?**

J2. Barnaamijyada waaya aragnimada dadka weyn ee banaanka waxaa laga ogolyahay kaliya Wajiga Labaad. Howlwadeenada barnaamijyada noocyadaan ah waa inay raacaan [Hagida Dib u furida Wajiga Labaad ee loogu tallogalay Ururada Madadaalada Banaanka](#) ayna u xadeyaan usu imaashooyinka sida waafaqsan [Hagida OHA ee Usu imaanshooyinka Wajiga Labaad](#).

**S3. Miyaa ciyaaraha tartamada banaanka laga ogolyahay Wajiga Labaad?**

J3. Haa. Diyaariyayaasha tartanka waa inay u hogaansamaan [Hagida OHA ee Wajiga Labaad ee loogu tallogalay Usu imaanshooyinka](#), [Hagida Dib u furida Wajiga Labaad ee loogu tallogalay Hawlwadeenada Goobta iyo Munaasabada](#) iyo [Hagida Dib u furida Wajiga Labaad ee loogu tallogalay Ciyaaraha Madadaalada, Ku Soo Noqodka La xadeeyay ee Ciyaarida La Cayimay](#). Diyaariyayaasha munaasabada waa inay sameeyaan qorsho lagu xadeynayo tirada daawadayaasha loo ogolaaday dhismooyinka si markaas qof walba uga fogaado lix (6) fuud dadka kale. Hawlwadeenada munaasabada waxaa looga baahanyahay inay ku xadeeyaan mugga usu imaanshaha ugu badnaan 250 qof ama tirada dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha, sida ku saleysan go'aaminta mugga (cabirka baaxada aaga/daganaanshaha), mid alle midee yar.

**S4. Miyaa tartamo laga ogolyahay inay ka dhacaan mid ka mid ah wajiyadaan?**

J4. Tartamada, sida tartanka gobolka, waa la ogolyahay. Howlwadeenada tartamada waa inay raacaan [Hagida Wajiga Labaad ee loogu tallogalay Howlwadeenada Goobta iyo Munaasabada](#) ayna xadeyaan tirada sida ay dhigayso hagida. Howlwadeenada tartanka waa inay sidoo kale raacaan [Amarka Fullinta](#) Gubanatooraha ee ku saabsan tallooyinka safarka ayna xadeyaan safarka aan muhiimka aheyn.

**S5. Miyay dadka waaweyn ee qabo curyaanimada ee ka tirsan isla kooxda guriga ay ka qeybgeli karaan xerada habeen dhaxa qoyska iyaga oo aysan aaga ku wehlin illaaliyayaashooda/daryeelayaasha?**

J5. Haa, howlwadeenada xeryaha qoysaska ee habeen dhaxa waxay adeegyo siin karaan qoysaska ama dadka waaweyn ee ku wada nool isku qoyska. Howlwadeenada xerada habeen dhaxa waxaa looga baahanyahay inay raacaan [Hagida Wajiga Labaad ee loogu tallogalay Ururada Madadaalada Banaanka](#) .

**S6. Miyay ururada xerada dhalinyarada siin karaan xerada habeen dhaxa qoysaska haddii howlaha oo dhan, musqulaha iyo jifka ay ku koobantahay qoyska kaliya?**

J6. Haa. Xerada qoyska habeen dhaxa waa laga ogolyahay Wajiga Labaad sida waafaqsan [Hagida Wajiga Labaad ee loogu tallogalay Ururada Madadaalada Banaanka](#). XHowlwadeenada xeryaha dhalinyarada habeen dhaxa waxay adeegyo siin karaan dhalinyarada haddii qeybaha jifka shaqsiyeed ama hoyga xerada la bixiyo.

**S7. Haddii dhalinyarada joogaan habeen dhaxa guri weyn oo daash ah oo ay kala fogyihiin ugu yaraan lix (6) fuud, ama uu u dhaxeeyo shay aan laga gudbi karin, taasi miyaa loo tixgeliyaa jiif shaqsiyeed?**

J7. Maya, inay dhammaantood ka imaadeen isla ha qoys mooyee. Howladeenada xerada habeen dhaxa waa inaysan isugu geynin dhalinyarada aan ku wada nooleyn isla hal qoys nooc walba oo jiif ah, oo ay ku jiraan kabiinada weyn oo qolalka gooniga ah leh. Qeybaha jiifka shaqsiyeed ama hoyga xerada oo gooni u ah qof walba ayaa loo baahanyahay. Xubnaha isku qoyska ah waa loo ogolyahay inay wada joogaan qeybta jiifka ama hoyga xerada.

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa dukumiintyo qaabab kale ah sida luqadaha kale, daabacaad ballaadhan, farta indhoolayaasha ama qaab aad adigu doorbidayso. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhsaha.state.or.us](mailto:OHA.ADAModifications@dhsaha.state.or.us).